



Helitaan karid la'aani waa takoorid

Bulsho wax walba ay furanyihiin wuxuu dadku uga qeyb qaadan karaa si isku mid ah iyadoon la eegeyn karaan xagga awoodda ah. Waxay taasi tusaale ahaan ku saabsanaan kartaa in wax la baran karo, la shaqeysan karo, la safri karo, lana gudan karo xaajooyin kala duduwan.

Marar badan waxaa jira caqabooyin kala duduwan. Mamnuucidda sharciga takooridda ee ka dhanka ah takooridda xagga helitaan karid la'aanta waxay ula jeeddadiisu tahay in uu gacan ka geysto in la helo bulsho cid walba u furan.

Muxuu sharcigu leeyahay?

Helitaan karid dhiman waxay xeerka takooridda kaga dhigantahay in qof cuuryaan ah la takooro iyadoo hawli – tusaale ahaan goob shaqo, dugsi ama dukaan – aysan qaadeynin tallaabooyin macquul ah si uu qofku u gaaro xaalad la barbar dhigi karo dadka aan qabin naafanimadaas iyada ah.

In lays takooro waxay marki si fudud loo dhaho ku saabsantahay in si aan caddaalad ahayn leesula dhaqmo, in uu qofku wax waayo ama la dhigo meel dadka kale ka hooseysa.

Maxay yihiin tallaabooyinka helitaan karidda ee ay wuxu ku saabsanyihiin?

Tallaabooyinka waxaa tusaale u noqon kara in leysi siiyo qalab wax caawiya (hjälpmedel) oo ay cidii u baahantahay si ay uga qeyb qaadato waxbarasho dugsi ama shaqo, in la simo meelaha kala sar-sareeya ee maqsinnada hortooda ah ama in liiska cuntooyinka maqaayadda kor loogu akhriyo ciddii u baahan.

Waxay ku saabsanaan kartaa in qof cuuryaan ah uu ka qeyb qaadan karo hawsha socota, xitaa haddii aysan taasi u dhici karin si boqolkiiba boqol la mid ah sida dadka kale.

Yaa xeerka soo gelaya?

Qofka naafada ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu soo jeediyo shuruudo ku aaddan helitaan karidda, haddii ay noqon lahayday xagga shaqada, dugsiyada, xagga daryeelka caafimaadka- iyo bukaanka iyo haddii ay noqon lahaydba xagga dukaamada iyo maqaayadaha.

Cidda meesha mas'uulka ka ah - tusaale ahaan shaqa bixiye, cid dugsi mas'uul ka ah ama milkiile dukaan - waa in uu qaadaa tallaabooyin macquul ah oo ku aaddan sidii uu meeshiisa uga dhigi lahaa meel aan ka xayirneyn qof naafo ah.

Maxay yihiin meelaha soo gelaya?

Mamnuucidda takooridda ee ku aaddan helitaan karid la'aantu waxay khuseysaa dhammaan aagagga bulshada ee xeerka takooriddu uu maanta soo koobayo, marka laga reebo marka ay qofi kireyneyso ama iibineyso guri. Waxaa ka mid ah waxyaabaha uu khuseeyo

- nolosha shaqada (arbetslivet)
- hey'adaha waxbarashada
- daryeelka bukaanka- iyo caafimaadka (xitaa shirkadaha daryeelka ee gaarka loo leeyahay)
- hey'adda adeegga bulshada (socialtjänsten)
- xiriirka uu shakhsigu la leeyahay hey'adaha dowladda (habka qaabilaadda)
- ka ganacsiga xagga badeecooyinka iyo adeegyada

Maxaa loola jeedaa in tallaabooyinku ay macquul noqdaan?

Qofka hawsha mas'uulka ka ah waa in uu qaadaa tallaabooyin macquul ah oo helitaan karidda ku aaddan. Haddaba tallaab caqli gal ahi maxay tahay? Su'aasha si guud ahaaneed loogama jawaabi karo ee waxay ku xirantahay xaaladaha xaalad kastaba gaarkeeda.

Halka laga amba qaadayo marka qiimeynta la sameynayo waa shuruudaha helitaan karidda ee shuruudca iyo xeerarka kale ku jira. Waxay tusaale ahaan ku saabsanaan kartaa xeerka jawiga shaqada, xeerka dugsiyada ama xeerka qorsheynta- iyo wax dhisidda. Haddii ay shuruudo nuucan ahi maqanyihiin waxay ku saabsantahay oo keliya tallaabooyin fudud oo helitaan karidda ku aaddan. Tusaale waxaa noqon kara in dukaan meel laga qaadi karo badeeco go'an ama in gaadiid dad weyne qof musaafir ah lagu wehliyo.

Marka waxa caqli galka ah qiimeyn lagu sameynayo waxay taasi sidoo kale ku saabsantahay waxyaabo ay ka mid yihiin duruufaha farsamo iyo dhaqaale ee ay hawli leedahay. Ilaa inta uu jirayo, baaxadda xiriirka qofka shakhsiga ah iyo hawsha ka dhexeysana sidoo kale miisaanka ayaa la saarayaa. Tusaale ahaan waxaa caqli gal loo arki karaa in wax dheeraad la dalbado marka leys shaqaaleysiinayo iyo marka waxbarasho dheer la dhiganayo marka la barbar dhigo xiriir waqti gaaban ah.

Laga billaabo dhulka ilaa iyo saqafka

In sharciga la raaco iyo in aan la jibin mamnuucidda takooridda ee ku aaddan helitaan karid la'aantu waa heerka ugu yar. Waxaa la dhihi karaa taasi waa dhulki. Si saqafka sare loo gaaro - in hawsha laga dhigo mid si buuxda ugu furan dadka naafada ah - waxaa loo baahanyahay wax dheeraad ah. In laga shaqeeyo si loo helo bulsho cid walba u furan waa in laga shaqeeyo in aan cidna laga tegin, raagitaan iyo xuquuqda bani'aadamka. Hal si, waa in billaw ahaantaba leysku dayo in hawsha qorshaheeda loo dhiso si loogu tala gelayo inta ugu badan ee suurta gal ah.

Wakiilka takooridda (DO)
www.do.se
Box 4057, 169 04 Solna
Taleefan 08-120 20700
e-mail do@do.se

Detta är en översättning till somaliska av DO:s informationsblad "Bristande tillgänglighet är diskriminering".